# Isku qorida dugsiga hoose/dhexe ee 2024



Bilaabida dugsiga waa waqti xiisa u leh carruurta, waalidka iyo daryeellayaasha. Waxaan doonaynaa in aan caawino nidaamka isqorida sida kuugu suurtagalsan adiga.

Victoria Gudaheeda, ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu tago dugsiga loogu talagalay ee agtaada ku yaalla) (dugsiga agtaada ah) oo hoos imanaya *Xeerka 2006 ee Dib u Qaabaynta iyo Tababarka Waxbarashada*.

Waxaad kaloo ka dalban kartaa dugsiga aan ku oolayn agtaada. Dugsigu wuxuu qadarin doonaa dalabkaaga waafaqsan Nadaamka Meelaynta. Macluumaad intaas ka badan ee Habka Meelaynta, booqo Bogga Isku-qorida Dugsiga.

## Mudaynta Qaabka Cusub ee Dawlad Goboleedka (Bareebka)

Sanadka ugu horreeya ee dugsiga hoose waxaa loogu yeeraa Asaaska ama bareebka. Waxaanu sii deynay mudayn cusub oo ah isku qorida New Foundation ee dhamaan dugsiyada hoose ee Fiktooriya si loola socdo (arag bogga 3aad). Mudaynta ujeedkiisu waa in lagaa caawimo inaad fahamto marka iyo sida loogu qoro ilmahaaga Asaaska sanad dugsiyeedka 2024.

## Goorma ayaan ku qorayaa ilmahayga sanadka ugu horreeya ee dugsiga hoose?

Waxaa waajiba in ilmahaagu ahaado 5 sano jir 30ka Abriil sanada ilmuhu bilaabayo dugsiga.

Dugsi geyntu waa ku khasab carruurta jirsatay 6 sanadood.

Si loogu qoro ilmahaaga dugsiyada Dawlada Fiktooriya sanada 2024, soo gudbi dalabka ku qorida ugu dambayn 28da Juulay 2023.

## Sidee ugu qorayaa ilmahayga sanada ugu horraysa dugsiga hoose?

Qaad talaabooyinkaan si aad ugu qorto ilmahaaga dugsiga hoose:

1. Ka hel dugsiga agtaada ah adoo isticmaalaya Hel Websaytka Dugsigayga (Find my School website) (arag hoose).
2. La xiriir dugsiga hoose si aad u ballansato soo-arkida dugsiga ama inaad barato wax badan oo ku saabsan dugsiga iyo habka dalabka isku-qorida.
3. La soo deg foomka dalabka macluumaadka ee bareebka {(Foundation (Prep) enrolment information pack from)} Enrolling in Foundation (Prep)} (oo la helli karo laga bilaabo 24ka Abriil 2023).
4. Soo gudbi dalabka isku qorida ee Foundation-ka **ugu dambayn maalinta Jimcaha ee 28da Juulay 2023**.
5. Waxaa lagula socodsiin doonaa natiijada dalabka **ugu dambayn maalinta Jimcaha 11ka Agoosto 2023**. Haddii aad hesho aqbalaada meelaynta, waxaa waajiba inaad aqbasho wixii lagu siiyey **ugu dambayn 25ka Agoosto 2023**.
6. Si aad uga qaybgasho macluumaadka iyo fadhiyada gudbinta **intii lagu jiray Teeramka 4ta 2023**.
7. Ilmahaaga ayaa bilaabi doona Foundation-ka **laga bilaabo Talaadada 30ka Janaayo, 2024**.

## Sidee ku hellayaa dugsiga agtayda ah?

Ka hel dugsiga agtaada ah websaytka Find my School website adoo qaadaya talaabooyinka hoose:

1. Ka gal findmyschool.vic.gov.au browser-kaaga.
2. Geli cinwaankaaga rasmiga ah ee degaanka agtaada ah 'Gelina cinwaanka si aad u bilawdo'.
3. Dooro 2024 oo ku hoos taal 'Sanada isqorida "Enrolment year". **Ogsoonow:** 2024 soonayaasha dugsiyada waxaa la heli doonaa dhamaadka teeramka 1aad, ee 2023.
4. Dooro Primary oo ku hoos yaala 'Nooca dugsiga' (School Type)'.

Khariidada ayaa muujin doonta cinwaankaaga, dugsiga agtaada ah, iyo dhinaca bidixda ah faahfaahinta dugsiga. Haddii aad hoos u degto, waxay kuu muujin doontaa shanta dugsiga ee ugu dhow cinwaankaaga.

Waxaad kaloo ku baari kartaa magaca dugsiga oo  hoos imanaya 'Search for school'.

## Ilmahaygu ma dalban karaa dugsiga hoose ee dawlada kaas oo aan ahayn dugsiga agtayada ah?

Haa, waad dalban kartaa mid aan ahayn kan agtaada ah.  Dugsigu waa qadarin doonaa dalabkaaga iyada oo la xiriirta Nadaamka Meelaynta iyo booska la helli karo. Waxaad ka heli kartaa sida loogu kala hormariyey  ku-qorida dugsiga  bogga.

## Maxaa dhacaya haddii aan hello warqad oranaysa dalabkayga isku qoridu ma guulaysan?

Waa inaad u dalabtaa ilmahaaga in lagu qoro dugsi kaleeto. Ilmahaaga waxaa looga balanqaaday boos dugsiga agtiisa ah. Ilmahaaga dugsiga agtiisa ah waa ka go'an tahay in uu ilmahaaga u hello iyada oo ku salaysan cinwaankooda degaanka ee rasmiga ah.  Booqo Find my School si aad u hesho  ilmahaaga dugsigiisa agagaaraha.   Bogga ku-qorida dugsiga ayaa ku caawim kara si loo ta'kiidiyo cinwaankaaga isku qorida.

Waxaad kaloo rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka.  Bogga Isku qorida Foundation (Prep) waxaa ku qoran macluumaadka habka rafcaanka looga qaato natiijada dalabka.

## Maxaa dhacay haddii aan gafo waqtiga isku qorida?

Waxaad dalban kartaa inaad ku qorto ilmahaaga Foundation-ka sanad dugsiyeedka 2024 laga bilaabo teeram 2aad ee 2023.

Marka lagu weydiisto inaad soo gudbiso dalabka isku qorida ugu dambayn 28da Juulay 2023, dalabyada taariikhdaan ka dambeeya dalabyada weli waa laga aqbalayaa qoysaska gafay waqtiga is-qorida, hellay degaan rasmiya ama dhowaan yimid Fiktooriya.

Dalabyada Isku qorida ee la soo qadimay wixii ka dambeeya  28da Juulay 2023 waxaa qabanaya markay helaan, sida waafaqsan meelaynta Nadaamka wasaarada.

## Xaggee ka heli karaa macluumaadka ku saabsan isku qorida dugsiga hoose?

Weydii dugsigaaga hoose ee maxaliga ah macluumaad intaas ka badan oo habka isqorida.

Bilawga teeramka 2aad, 2023 waxaad kaloo awoodaa inaad hesho xaashida macluumaadka ee habka isku qorida  Isku qorida Foundation-ka (Prep) bogga Bilaabida dugsiga.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawimo tarjumaada macluumaadka, fadlan la hadal dugsiga hoose wixii caawima ah.

## Yaan kala xiriirayaa wixii caawima ah?

Isu-duwaha Gudbinta, Sarkaalka Ku-qorida ama Maamulaha dugsiga hoose ee aad rabto inaad dalbato wuxuu doonayaa inaad dalbato si aad u caawimi karto su'aal kasta oo laga yaabo inaad wax ka qabto habka ku qorista.

## Xiriirada muhiimka ah

Fadlan raadi xiriira muhiima kuwaas oo ku caawimi kara marka ilmahaagu bilaabo dugsiga hoose ee sanada 2024.

Raadi dugsigayga – findmyschool.vic.gov.au

Macluumaadka soonayaasha dugsiga – vic.gov.au/school-zones

Isku qorida Asaasiga (Prep) – vic.gov.au/enrolling-foundation-prep

Isku qorida dugsiga – vic.gov.au/how-choose-school-and-enrol

Iinta iyo ka mid ahaanta waxbarashada – vic.gov.au/disability-and-inclusive-education

Xafiiska Xiriirada Goboleed – vic.gov.au/office-locations-department-education-and-training

# Mudada 2023-24

| Taariikhaha 2023 | Xarakaadka |
|---|---|
| **Teeramka 2aad: Isniinta 24ka Abriil 2023 – Jimcaha 23ka Juun 2023** | |
| **Teeramyada 1aad iyo 2aad, 2023** | Dugsiyada hoose waxay qabtaan indha-indhayn, macluumaad siinta qoysaska doonaya gelitaanlka Asaasiga (Prep) ku qoritaanka ilmahooda sanada 2024. |
| **Bilawga teeramka 2aad, 2023** | Soonayaasha dugsiga sanad dugsiyeedka 2024 noloshuna waa socotaa [findmyschool.vic.gov.au](findmyschool.vic.gov.au)<br>Waalidiinta/daryeellayaashu waa inay galaan [findmyschool.vic.gov.au](findmyschool.vic.gov.au) si ay u hellaan dugsiyada ay ku xusan yihiin sanad dugsiyeedka 2024.<br>Macluumaadka Isku qorida ee waalidiinta/daryeelayaasha waxaa laga hellaa iyada oo lagala soo baxayo [Enrolling in Foundation (Prep)](). |
| **Laga bilaabo Asbuuca 1aad, Teeramka 2aad 2023** | Dugsiyada hoose waxaa laga yaabaa inay u qaybiyaan macluumaadka Iskuqorida oo dhamaystiran iyo bulshada dugsiga. |
| **Laga bilaabo Asbuuca 1aad, Teeramka 2aad, 2023** | **Dalabyada Isku-qoridu waa u furan yihiin** – waalidiinta/daryeellayaasha waana laga yaabaa inay soo qadimaan dalabkooda isku qorida ee la buuxiyey dugsiyada Hoose ee Xukuumada laga bilaabo maalintaas. |
| **Teeramka 3aad: Isniinta 10ka Juulay 2023 – Jimcaha 15ka Sebtembar 2023** | |
| **Jimcaha 28ka Juulay 2023** | **Dalabyada isqorida ee** – xannaaneeyaha/waalidiinta waa inay u soo diraan dalabka isqorida oo dhammeystiran dugsiga hoose ee dawlada  taariikhdan. |
| **Maalinta Jimcaha 11ka Agoosto 2023** | Dugsiyada hoose waxay la socodsiiyaan waalidiinta/daryeellayaasha si qoraalla Natiijooyinka Isku qorida Foundation-ka, siday ugu kala mudan yihiin meelaynta sida waafaqsan Nadaamka Meelaynta ee wasaarada. Kan waxaa ku jiri kara warqad lagu ta'kiidinayo isku qorida, warqad lagu siinayo booska, ama warqad loogu sheegayo in aanay ku guulaysan dalabkoodii.<br>Waalidiinta/daryeelayaasha loo diray ku guulaysi la'aanta dalabka waxaa laga yaabaa in ay bilaabaan rafcaan ah ku meelayn la'aanta dugsiga hoose ee ay door bidayaan. |
| **Ugu dambayn 25kii Agoosto 2023** | Waalidiinta/daryeellayaasha loo diray warqada boos siinta waxay muujinaysaa aqbalaada booska ilmahooda taariikhdaas. |
| **Ugu dambayn 25kii Agoosto 2023** | **Taariikhda xiritaanka** ee waalidinta/daryeelayaashu inay soo gubiyaan rafcaanka ku meelaynta dugsiga ay door bidayaan waa. |
| **Jimcaha 15ka  Sebtembar 2023** | Dugsiga Hoose wuxuu u sheegaa dhamaan waalidiinta/daryeelayaasha, si qoraalla ah, natiijada rafcaankoodii meelayn la'aantooda taariikhdaas. |
| **Teeramka 4aad: Isniinta 2da Oktobar 2023 – 20ka Diseembar maalinta Arbacada 2023** | |
| **Inta lagu jiro teeramka 4aad, 2023** | Dugsiyada hoose waxay martigeliyaan kulamada usii gudubka. |
| **Maalinta Jimcaha 20ka OKtoober 2023** | **Taariikhda xiritaanka** waalidiinta/daryeellayaashu waxay soo gudbiyaan rafcaan ah meelayn la'aanta oo loo qorayo Maareeyaha waxbarashada Goboleed, kaas oo aanay ku guulaysan rafcaankooda dugsiga hoose ee ay door bidayaan. |
| **Ugu dambayn Jimcaha 17ka Nufeembar 2023** | Goboladu waxay kula socodsiiyaan dhamaan waalidiinta/daryeellayaasha qoraallada rafcaanka meelayn-la'aanta taariikhdaan. Kani wuxuu khuseeyaa keliya rafcaanka la hellay taariikhda xiritaanka oo ah Jimcaha 20ka Oktoobar, 2023. |